# Bayaanka Dadweynaha ee Habraaca Caafimaadka iyo Badbaadadda Dugsiyada Dadweynaha Portland

Iyada oo dhawaan ay korodhay tirada dadka u soo dhacaya fayriska nooca cusub ee Omicron dartiis,sidoo kalena ay weheliso walaaca iyo walbahaarka joogtada ah ee uu sababay xanuunka faafaya oo saameeyey dhammaanteen haddii ay noqoto qof ahaan iyo bulshada oo dhan. Qeyb kasta waxaa soo wajahayey caqabado taasi oo ayna Dugsiyada Dadweynaha Portland ka maqneyn. Waxaan ognahay oo aynaan cid kale inooga warameyn xal u helida culeyska xanuunka faafaya, gaar ahaa iyada oo ardaydeena oo si weyn ugu baahan iyaga oo u qalma helitaanka degnaansho iyo inay helaan waxbarashadii ay ku qaadanayeen fasalada dugsiyadooda.

Shalay duhurkii, waxaa na soo gaartay warqad ay ku saxeexan yihiin koox kalkaaliyaasha caafimaadka Addeegyada Waxbarashada Degmada Multnomah (MESD), saxeexayaasha warqadani qiyaastii saddex meelood meel ka mid ahi ma jirto wax hawl shaqo oo ay ka hayaan Dugsiyadda Dadweynaha Portland (PPS), taasi baa keentay su'aasha shakiga galinaysa caafimaadka iyo tallaabooyinka badbaadadda dugsiyada PPS oo dhan. Waxaan rabnaa inaan fursadan uga faa'iideysano inaan xasuusino qoysaskayaga, ardayda, shaqaalaha iyo guud ahaan bulshada arrimaha ku saabsan habraacyada caafimaadka iyo badbaadadda loo diyaariyey inay ilaaliyaan ardayda iyo shaqaalaha **iyada** oo aan u mahadcelineyno shaqaalahayaga ka shaqeeya dugsiyada dadaalkooda iyo sida ay uga go'an tahay inay ka dhigaan dugsiyadeena kuwa leh jawi nabadgelyo:

- Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxay sii wadaan inay ku tiirsanadaan **khabiirada caafimaadka dadweynaha** inay soo wargaliyaaan go'aanada la xiriira caafimaadkeena iyo badqabkeena sidii loo xadidi lahaa faafitaanka xanuunka COVID-19. Wargalintaasi waxaa ka mid ah kulanada tallo-bixinta todobaadlaha ah iyo tallo-bixiyaasha qofeed ee khabiirada caafimaadka, oo ay ka mid yihiin saxeexayaasha xaashidani.
- Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay sii wadaan inay abuuraan u helitaanka ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska **tallaaladda COVID-19,** oo uu ku jiro tallaal xoojiyaha(booster). Waxaan ka mahadnaqeynaa in shaqaalaheenu 98% ay si buuxda u tallaalan yihiin, iyada oo ay aad u sarreyso tirada dadka istallaalay ee Degmada Multnomah.  Marka aad eegto guud ahaan Degmada Multnomah, tiro ku dhow 85% oo ah dhammaan ardayda 12 sanno ilaa 17 jirka ah iyo iyada oo in ku dhow 50% kuwaasi oo ah caruurta da'doodu u dhaxayso 5 sanno ilaa 11 jirka ah waxay qaateen ugu yaraan hal tallaal.  Waxaan sii wadeynaa inaan dhiirigalino qof kasta inuu qaato tallaalka iyo tallaal xoojiyaha lagaga gaashanayo xanuunka COVID-19.
- Dugsiyada Dadweynahah Portalnd(PPS) oo kaashanaya MESD waxay geeyeen dhammaan dugsiyadeena xirfadlayaala caafimaad dugsiyada. Sanad-dugsiyeedkani, heshiiskii aan la lahay MESD wuxuu kordhiyey tirada kalkaaliyaasha caafimaadka(RNs) iyo kalkaaliye-xigeenada caafimaadka dugsiyada(SHAs) qiyaastii 15%.  **Waxaan sidoo kale nahay dugsiyada Degmada Multnomah heshiis qandaraas leh MESD inay shaqaaleysiio Kalkaaliye-xigeeno caafimaad(SHAs) dugsi kasta oo dugsiyadeena ah.** MESD waxay sii wadayaan inay shaqaale qaataan ay ka shaqaaleysiiiyaan dhammaan

dugsiyadeena iyo gobolkeena, iyo inay dhiirigaliyaan dadka xiiseynaya inay shaqo ka soo codsadaan inay tagaan online.

- Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxay ku rakibeen in ka badan **5,500 oo filtarada HEPA ah,** oo ay ka mid yihiin meelaha la dhigay goobaha waxbarashada iyo makhaayadaha- iyada oo ay ku baxday maalgalin in ka badan $ 3.9 malyuun doolar. Hawo sifeeyaasha lala guurguuro waxay siiyaan hawo sifeeyaasha heelka-HEPA, iyaga oo awood u leh inay ka saaraan 99.97% qeybaha yaryar 0.3 microns. Tani waa heerka sifeynta loo isticmaalo inay qabtaan fayriska hawadu sido.
- Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay kor u qaadeen **filtaradii hore u yaalay dugsiyadeena ee nidaamka farsamada ah oo laga dhigay heerarka MERV 13.** Filtaradani heerkeedu sareeyaan waxay siinayaan lakabyo kale oo ka ilaaliya fiditaanka xanuunka COVID-19.
- Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS)waxay sii wadaan meel marinta gobolka ee shuruuda ah in dhammaan dadka waaweyn iyo ardaydu ay xirtaan afsaabka waqti kasta, iyada oo aan loo eegin xaaladooda tallaal. Maanta, Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxaa gacantooda ku jira in ku dhow 100,000 nooca afsaabka **KN95,** kuwaasi oo la siinayo xubin kasta oo shaqaalaha ka mid ah kaasi oo codsada inay mid la siiyo. Waxaan sidoo kale haysanaa in ka badan **1 milyan oo ah afsaabyada(mask) kuwa ku haboon da'da** ardayda. Waxaan hubineynaa dugsiyada si aan u xaqiijino inay ogyihiin habka sida loo soo codsado ee loo soo gaarsiinayo KN95.
- Iskaashi dhow oo aan la leenahay Hay'ada Caafimaadka Oregon (OHA), Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay siiiyaan si joogta ah fursado ardayda iyo shaqaalaha labadaba lagaga **baarayo xanuunka COVID-19.**:
    - Baaritaanka ardayda IYO shaqaalaha astaamaha xanuunka leh: Baaritaankani ardayda iyo shaqaalaha waa kuwa ay ka muuqdaan calaamadaha COVID-19 inta lagu gudo jiro maalintii dhismayaasha dugsiyada.
    - Baaritaanka todobaadlaha (ayna ka muuqan astaamaha xanuunka) ee ardayda iyo shaqaalaha: Barnaamijka baaritaanka todobaadlaha ah waxaa loo siinayaa inay hore ka ogaadaan xanuunka COVID-19, xitaa marka ayna ardayda ka muuqan wax astaamo cad ah oo u eg calaamadaha lagu garto xanuunka COVID-19.
    - Goobaha baaritaanka shaqaalaha ee xanuunka COVID-19: Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay u sameeyeen shaqalaha dugsiyada goobo lagaga baaro xanuunka COVID-19 iyo shaqaalaha ka shaqeeya dugsiyada saddex jeer todobaadka dadka waaweyn ee dhawaan la kulma qof qaba xanuunka COVID-19, kuwaasi oo qaatay tallaal dhammeystiran laakiin ayna ka muuqan wax astaamaha lagu garto xanuunka.
- Dugsiyda Dadweynaha Portland (PPS) waxay sii wadi inay ku tiirsanaadaan inay raacaan tilmaamaha ay bixinayaan caafimaadka dadweynaha. Tusaale ahaan, marka aad eegto tiro yaraanta baaritaanka xanuunka COVID-19 ee wadanka, tilmaamaha Hay'ada Caafimaadka Oregon(OHA) waxay caddeeyeen in dugsiyada degmada ay suurtagal tahay inay si ku meel gaar ah u isticmaalaan qalabka la isku baaro Abbott BinaxNOW oo waqtigoodu dhacay haddii baaritaanka qofka ee isticmaalayaa tayadiisu ay tahay mid wali shaqeyneyso.

Waxaan sii wadaynaa anaka oo aamin inay dugsiyadeenu intii suurtagal ah sii furnaadaan, iyada oo la xoojinayo, la hagaajinayo lana xoojinayo dhammaan tallaabooyinka badbaadadda ee suurtagal ah- waqtigani la joogo. Xogto la ururiyo waxay na tuseysaa in dugsiyadeenu ay qeyb ka yihiin goobaha ardayda ee ugu nabada badan- iyada oo lakabyo iyo istaraatijiyado nabadgelyo

caafimaad oo ilaalinayo sida iyada oo dhammaan ah loo xiranayo afsaabka, tallaalka iyo tallaal xoojiyaha si joogta baaritaanka COVID-19. Todobaadyadii dhawaa, iyada oo la iswaafajinayo tilmaamaha Degmada Multnomah, Hay'ada Caafimaadka Oregon iyo Waaxda Waxbarashada Oregon, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay xoojiyeen dadaaladeena lagu yareynayo. Waxaad ka akhriyi kartaa in badan oo ka mid isbedelada halkan:

- Shuruudaha afsaabka ee ciyaaraha iyo bandhiga farshaxanada
- Tilmaamaha kaaritiinka ee qofka u dhawaaday qof qaba xanuunka
- Shuruudaha wargalinta iyo baadi-goobka qofka loo dhawaaday

Haddii aanu nahay hoggaamiyaasha dugsiyada degmada, waa mas'uuliyadayada inaan siino jawi caafimaad iyo badqaba arday kasta iyo xubnaha shaqaalaha. Waxaan sii wadaynaa inaan raacno tilmaamaha ay bixinayaan hay'adaha caafimaadka dadweynaha, hagaajinta heerka hawlgalada loo hirgalinayo sida loogu baahdo, iyo in si degdeg ah loo xiriiro shaqaalaha iyo qoysaska xiriirkaasi oo ku saabsan isbedelada xaalada ku socda sida dhakhsaha leh u socda. Waxaan si qoto dheer u qiimeynaa asxaabtayada ka shaqeeya dugsiyada ee ku dadaalaya sidii ay u horumarin lahaayeen xalal noo mideeya himilooyinka naga dhexeeya ee waxbarista da'yarta ardaydeena magaalada.

**Jonathan Garcia**
Madaxa Shaqaalaha
Dugsiyada Dadweynaha Portland